# Istaraatiijiyadda Kala Duwanshaha Dhaqanka iyo Luuqadda 2025 warbixinta horumarka sannadlaha ah: iyadoo lasoo koobay

## Ku saabsan warbixintan

30-kii bishii Abriil 2024, Hay'adda Caymiska Naafada Qaranka (National Disability Insurance Agency - NDIA) ayaa soo saartay Istaraatiijiyada Kala Duwanaanshaha Dhaqanka iyo Luuqadaha 2024 ilaa 2028.

Waxay ku muujinaysaa horumarka laga gaaray natiijooyinkayaga mudada-gaaban ah ee khuseeysa istiraatijiyadda iyo qorshe-hawleedka laga bilaabo 30-ka bisha Abriil 2024 ilaa 30-ka bisha Abriil 2025.

Warbixinta oo dhammaystiran waxaad ka heli kartaa shabakadda NDIA.

## Istaraatiijiyada CALD

Bulshooyinka dhaqan iyo luqad ahaanba ku kala duwan (Culturally and linguistically diverse - CALD) ayaa muhiim u ah bulshada Australia iyo aqoonsiga.

Waxaan ognahay dad qaba naafada ah ee ka soo jeeda bulshada CALD inay la kulmaan caqabado u gooni ah marka ay noqoto inay kala bartaan, ama helaan iyo sidoo kale isticmaalka Qorshaha Caymiska Naafada Qaranka (NDIS).

Istaraatiijiyada iyo qorshe-hawleedka ayaa qeexaya sida ay nooga go'an tahay inaan la shaqeyno dadka naafada ah ee ka soo jeeda bulshooyinka CALD. Waxaan

rabnaa inaan ka caawinno sidii ay ku gaari lahaayeen natiijooyinka laga helo Qorshaha si la mid ah dadka kale ee naafada ah.

## Ujeedooyinka Istaraatiijiyadda

- Inay u fududeyso bulshooyinka CALD inay helaan kana qeybgalaan NDIS.
- Inay hormariso sida ay qorshayaasha NDIS-ta u muujiyaan baahida dadka ka qeyb-qaadanaya ee CALD.
- Inay hagaajiso Khibradaha dadka ka qeyb-qaadanaya ee ka soo jeeda CALD.

Istaraatiijiyadu waxay leedahay 6 mudnaanood:

**Kaabayaasha (infrustructure)**

Hagaajinta nidaamyadeena iyo habraacyadayada lagu taageerayo ka qaybgalayaasha CALD.

**Kartida shaqaalaha**

Kor u qaadida tayada shaqaalaha si ay si fiican uga jawaabaan baahiyaha dhaqan ee ay qabaan ee ka qaybgalayaasha.

**Xogta/wadahadalka oo si sahlan loo heli karo**

In la isla wadaago macluumaadka qaabka ay u doonayaan bulshooyinka CALD.

**Suuqyada**

In laga caawiyo shirkadaha bixiya NDIS-ta sidii ay ku bixin lahaayeen adeegyo daboolaya baahiyaha dhaqan ee ka qaybgalayaasha CALD, qoysaskooda iyo daryeelayaashooda qabaan.

**Xogta (Data)**

In loo isticmaalo xogta si wanaagsan si loo horumariyo adeegyada ay helayaan ka qaybgalayaasha CALD.

**Wacyigelinta**

Adeegyada ku xiraya isla markaasna wax lagu barayo bulshooyinka CALD ee aan helin NDIS.

# Waxyaabaha ugu muhiimsan ee sanadka

## Qorshaha ka mid noqoshada NDIA ee bulshada CALD 2024-27

Bishii Maajo (May) 2024, waxaan soo bandhignay Qorshaha NDIA ee Ka-qeybgelinta CALD 2024-27. Tani waxay naga caawinaysaa inaan abuurno goob shaqo oo ay dadku:

- ku dareemayaan in la xurmeynayo
- soona bandhigi karaan shaqsiyadooda dhabta ah inay shaqeeyso.

Waa hal dariiq oo aan ku horumarinayno awoodda shaqaalaha taas oo qayb ka ah istaraatiijiyadda.

Qorshaha ka-qeybgelinta waxa uu leeyahay 28 ficil oo aanu fulin doono inta u dhaxaysa 2024 iyo 2027. Ficiladaas waxay ka turjumayaan 4 meelood oo diirada la saarayo:

- Karti dhamaqameed iyo hogaamin
- Dhaqan qeyb ka ah
- Siyaasad iyo dhaqan ku aadan ka-qeybgelinta
- Horumarin iyo dalacsiin shaqo.

Waxaan dadka gaarsiinay dhowr waxyaabood oo muhiim ah sidoo kalena waxaan bilownay inta hartay.

## CALD Kooxaha talasiinta gudaha iyo Dibadda

Waxaan samaynay Kooxda La-talinta Dibadda. Tan waxay xaqiijinaysaa inaan maqalno isla markaasna aan aqoonsanno codadka dadka naafada ah ee ka soo jeeda bulshooyinka CALD.

- Xubnaha waxaa ku jira dad leh waayo-aragnimo nololeed ama kuwa yaqaan baahida dadka naafada ah ee ka soo jeeda bulshooyinka CALD.
- Kooxdu waxay kulmaan laba jeer bishii.

Waxaan sidoo kale samaynay Kooxda La-talinta Gudaha ee CALD. Tani waxay bixisaa caawimaad iyo kafaalo-qaad si loo hirgeliyo ficillada istiraatijiyadeed.

Xubnaha waxaa ka mid ah:

- Horyaalka NDIA CALD
- Shaqaalaha Sare ee Adeegga Fulinta
- Agaasimayaasha qaabeeya isla mar ahaantaasna bixiya dib u habaynta Qorshaha

## Hawlaha ka-qaybgalka bulshada

12-kii bilood ee u dambeeyay inta aan la gaarin 30-kii Abriil 2025, waxaan ururada bulshada iyo adeegyada guud u qabanay 192 howlo. Waxaan la xiriirnay ilaa 2,200 oo daneeyayaal ah.

Howlahaas waxay hormariyaan macluumaadka ku saabsan NDIS ee ay bulshooyinka CALD helaan. Hadafyadu waxay ahaayeen in la caawimo dadka naafada ah ee ka soo jeeda bulshooyinka CALD:

- helitaanka NDIS.
- isticmaal taageerooyinka naafada.

Hal tusaale, waxaan la shaqeynay Shabakadda Caafimaadka Qaxootiga ee Australia. Waxaan qabanay kulamo si aan dadka uga caawino inay fahmaan nidaamyada NDIS iyo sida ay ula shaqeeyaan nidaamka caafimaadka.

Kulamadaas ayaa sidoo kale ka caawiyay xirfadlayaasha caafimaadka:

- inay dadka tusaan sida loo heli karo NDIS
- in la xaqiijiyo inay bixiyaan macluumaad iyo taageero dhaqan ahaan ku habboon dadka naafada ah ee ka soo jeeda bulshooyinka CALD.

# Hirgelinta istaraatiijiyadda

## Dib-u-habaynta NDIS

Bishii oktoobar 2024, sharciyo cusub oo NDIS khuseeya (*Wax-ka-bedelista Qorshaha Caymiska Naafada Qaranka [In NDIS-ta lagu soo celiyo kaalinteedii No.1] Sharciga ah*) ayaa dhaqan galay. Tani waxay timid wixii ka dambeeyay markii ay hay'adu daabacday istiraatiijiyadda CALD iyo qorshe-hawleedka.

Sharciyada cusub waxay ka dhigan yihiin in dib-u-habayn ballaaran lagu sameyn doono NDIS-ta 5-ta sano ee soo socota. Wada-qaabaynta iyo shaacinta dib-u-habayntan ayaa ah mudnaantayada wakhtigan.

Dib-u-habaynta ayaa caqabado ku ah istaraatijiyada CALD. Balse waxay sidoo kale fursad u yihiin in baahiyaha ka qaybgalayaasha CALD lagu daro sida aan u naqshadeyno NDIS si ay mustaqbalka u shaqeyso.

## Waxa aanu samaynayno

- Waxaanu doonaynaa in dib u habaynta lagu tixgaliyo baahiyaha ka qaybgalayaasha iyo dadka naafada ah ee ka soo jeeda bulshooyinka CALD.
- Waxaan u qaabayn doonaa isla mar ahaantaasna u isticmaali doonaa isbeddelada si waafaqsan aragtida istiraatiijiyadda CALD.
- Waxaan dib u eegis ku sameyneynaa sida aan u hirgelinno ficillada istiraatijiyadeed.

- Waxa laga yaabaa in aan wax ka badelno tallaabooyinka qaar iyadoona lagu saleynayo khibradeena ku saabsan istiraatijiyadda CALD iyo qorshe-hawleedka 12-kii bilood ee la soo dhaafay.
- Waxaan kooxda la-talinta dibadda ee CALD iyo kooxda la-talinta gudaha kala shaqeyn doonaa dib u eegistan.
- Waanu isla wadaagi doonaa natiijada.

## La shaqaynta guud ahaan dawladda

Tallaabooyinka qaar, waxaanu la shaqaynay waaxyaha dawladda iyo hay'adaha ay ka mid yihiin:

- Guddiga Tayada iyo Ilaalinta ee NDIS (Guddiga NDIS)
- Waaxda Adeegyada Bulshada
- Waaxda Arrimaha Gudaha.

Qorshayaashooda shaqo iyo agabkooda kala duwan ayay micnaheedu tahay in howlaha qaar ay bilowdeen goor dambe marka loo eego qorshe-hawleedka.

Waxaan la kulanay Adeegyada Australia (Services Australia) si aan wax uga barano khibrada ay u leeyihiin la shaqaynta ay la shaqeeyaan bulshooyinka CALD iyo dawlada oo dhan.

Waxaan la sii shaqeyn doonaa meelaha kale ee dawladda si aan u helno qaabab lagu horumarin karo hawlaha.

## Shaqaalaha iyo gabaabsiga suuqa

Waxaan aragnay baahida loo qabo in wax laga qabto tirada yar ee turjubaanada sharciyeysan ee la qoonsan yahay ee luuqadaha kala duwan ku hadla oo ay ku jirto Auslan. Waan ognahay in tani ay caqabad ku tahay helitaanka NDIS iyo in la isticmaalo qorshayaasha NDIS.

NDIA waxay leedahay habab xaddidan oo ay ku saameyn karto shaqaalaha inta ay la eg yihiin. Laakiin waxaan sii eegi doonaa sida aan u caawin karno turjubaanada hada shaqeynaya sidii ay ku fahmi lahaayeen NDIS-ta.

## Soo koobida horumarka

Warbixinta Sannadlaha ahi waxay muujinaysaa horumarka natiijooyinka muddada-gaaban ee istiraatijiyadda CALD iyo qorshe-hawleedka 30-kii bisha Abriil 2025. Kuwaani waa yoolalka aan rabno inaan gaarno 2-da sano ee ugu horreysa ee istiraatiijiyadda.

Natiijooyinkan ka mid ah 28-ka ficil ee ku jira qorshe-hawleedka CALD:

- Waxaan dhamaystirnay 1.
- Waxaan bilownay 15.
- Ma aanan bilaabin 12.

Waxaan haynaa cusbooneysiinta xaaladda tallaabo kasta ee ay ku jirto warbixinta dhameystiran ee laga heli karo bogga internetka.

Booqo www.ndis.gov.au/strategies/cultural-and-linguistic-diversity-strategy si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan:

- Istaraatiijiyada CALD 2024-2028
- Qorshe-Hawleedka Istaraatiijiyadda CALD
- 2025 Warbixinta Sannadlaha ah ee Istaraatiijiyadda CALD